



Federal Republic of Somalia  
Ministry of Foreign Affairs and International Cooperation

**War saxaafadeed (Faafin degdeg ah)**

Muqdisho, Soomaaliya  
26 Maarsa, 2018

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyadoo ilaalinaya danta ummadda Soomaaliyed, dhowreysana deris wanaaga, isu furnaanshaha ganacsiga, isu socodka dadka walaalaha ah ee Beledxaawo iyo Mandheera degan, waxay dadweynaha Soomaaliyed guud ahaan, dadka degan Beled Xaawo gaar ahaan, la socodsiiynasaa arrimaha soo socda:

- 1- In Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo" seddex xilli oo kala duwan kala hadlay Madaxweynaha Kenya H.E. Mr. Uhuru Kenyatta arrinta ku saabsan derbiga laga dhisaayo inta u dhexeysa Beled Xaawo iyo Mandheera.  
Wadahadalka labada Madaxweyne ayaa ku kala beegnaa xilli yada hoose ku xusan:
  - March 22, 2017, Boqashadii rasmiga ahayd ee Madaxweynaha Soomaaliya uu ku tegay magaalada Nairobi, kulana kulmay dhiggiisa Kenya.
  - March 22, 2018, labada Madaxweyne waxa ay ku wada hadleen khadka isgaarsiinta.
  - March 24, 2018, labada Madaxweyne waxa ay markale ku wada hadleen khadka isgaarsiinta.
- 2- Madaxweynayaasha Soomaaliya iyo Kenya waxa ay isku afgarteen in derbiga dhisiddiisa la joojiyo.
- 3- Madaxweynayaasha Soomaaliya iyo Kenya waxa ay isku afgarteen in la sameeyo guddi wadaag ah oo labada dhinac ah ayna kala hoggaamin doonaan guddoomiyeyaasha labada gobol ee Soomaaliya iyo Kenya.

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay u taagan tahay ilaalinta danta ummadda Soomaaliyed iyo deris wanaag ku dhisan xushmad dhaafsi.

###